Khudbad Sannadeedka Madaxweynaha Jsl

Mudane:

Axmed Maxamed Silanyo

ee Labada Gole ee Baarlamaanka Jsl

07 February 2011

Somaliland Presidency

Contents

1. Hordhac..... 3

2.Duruufaha aanu Dhaxalnay..... 4

3.waxqabadka Xukuumada Cusub..... 5

4.Qorshe Sannadeedka Cusub..... 12

1. Dhaqaalaha..... 12

2.Arrimaha Bulshada..... 15

3.Dawlad Wanaaga..... 18

4. Wacyigalinta iyo Isgaadhsiinta..... 19

5.Nabadgalyada..... 19

6.Arrimaha Siyaasada Gudaha..... 20

5. Gabogabo..... 21

1. Hordhac

Biamilahi Raxmaani Raxiim,

Al- Xamdu-Lilahi, Ilaahay ayaa mahad leh,

Shirgudoonka Baarlamaanka, mudanayaasha labd Gole,

Wasiirada, marti sharafta, dadwaynaha iyo saxaafadda . waxaan waxaan idinku salamayaa salaanta Islaamka “Assalaamu Calaykum wa Raxmatullaahi wa Barakaatu”

Waxa maanat la jooga wakhtigii aan la wareegi lahayn talada dalka ee shicibka Somaliland noo doortay muddo dhan 189 maalmood.

Ugu horayn, waxaan salaam iyo mahadnaq u dirayaa dhamaan shacbiga Somaliland gudo iyo dibedba meelkasata oo ay ku nool yihiin.

Mudanayaaal iyo Marwooyin,

Waxa milgo iyo Maamuus wayn ii ah in aan hor imaado Baarlamaanka Somaliland (Guurtida iyo Wakiiladda) taas oo aan ka hor jeedinayo khudbad Sanadeedka sida uu dhigayo Duatuurka JSL. Haddaba, inta aanan khudbadayda galin waxaan u mahad naqayaa Hay,adda AWEPA oo inoo suurtoa galisay dhismaha Hoolkan quruxda badan ee aynu fadhino. Waxaan jecelahay in aan khudbadayda maanta ku soo bandhigo mudadii gaabnayd ee aan xilka hayey caqabadihii xukuumadaydu la kulantay, wixii u qabsoomay , iyo waxyaabaha u qorshaysan inay qabato sanadkan cusub ee 2011.

2.Duruufah aanu Dhaxalay

Hadaba si aad u fahantaan arrimahan waxaan marka hore dulmar kooban ku samaynayaa duruufaha adage e Maamulkayga la kawsaday

Waxaanu dhaxalnay

- khasnada madhan, oo ay dul hooganayaan day,mo xad dhaaf ah oo dhan 70 Billyan oo Shilnak Somaliland ah una dhiganata 12amillion oo Dollar. Lacagtaas oo iskugu jirtay:

1. Afar bilood oo Mushahar ah oo aanay shaqaaluhu qaadan,
2. Kharash Dawladeed sida: shidaal, Dayactir, Isgaadhsiin, Nal, Biyo IWM oo aan la bixinin.

- taasi oo ay dheereyd lacagtii dalka u talay Baanka dhexe oo dhan in ku dhaw Kow iyo toban Milayan oo shilin (SL.SH/ = 10,916,443,202) iyo in ka badan laba milayan oo Dollar ($2,002,864), oo la waayay. Duruufagaa adagi waxay shaqaalaha dhaxalsiiyeen in aanay shaqayn wax ka badan 3 sacadood malintii. Waxaa intaa dheeraa maamul xumo, musuqmaasuq baahsan, kala danbeyn la'aan ragaadisey habsami u socodka hawlaha Qaranka.

- waxaanu dhaxalnay Hantidii danat guud oo la xalaashaday, dhul boob, wadooyin burbursan, wadooyin burbursan, Cisbitaalo Liita, Waxbarasho tayo hoosaysa iyo shabi aan midaysanayn oo aan inta badana xukumada ku xidhnayn.

- Dhibaatooyinka kale ee aanu ka dhaxalay ee wali qabyada ah wax ka mid ah

    A. Cadaalad daro baahasan,
    B. Warbaahinta Qaranka , khaasatan Idaacadda Qaranka o aan dhaafin Caasimadda .
    C. Shaqo la'aanta balaadhan,o ay da'yartii rajo beeshay una dhaqaaqday Tahriib iyo Tacabir
    1. Heshiisyo is burinaya oo lala galay shisheeye iyo sokeeyeba.

3. Waxqabdka xukumada cusub

Si aanu duruufahaa adag uga saaro, waxaanu qaadanay talaabooyin muhiim ah oo lagu waajagayi dhibaatooyinkaas:

1. Mudo shan bilood gudahood ah, waxaanu ku bixinay dhamaan mushaharkii shaqaalaha Dawladda ka maqnaa, bil walban haatan waxaanu bixinaa marka ay dhamaato.
2. Guud ahaan dayntii Qaranka lagu lahaa oo dahn Toddobaatan Bilyan oo shilin

(**SL SH/ = 70,000,000,000**) shan bilood gudohood ayaanu ku bixinay. Ku tal galka wax qabab ee Dawladu wuxuu hirgalaa marka cashuur la helo.

3. Haddaba, si loo kobciyo dhaqaalaha Dawladda, waxaa soccta diiwaan-galin iyo Tirakoob lagu sameeyay maheraddaha iyo Daaraha Magaalooyinka waayan, waxaanu kaloo diyaarinay qaabkii lagu ururin lahaa cashuurihii baaqan jirayu
4. Waxaanu ka dhisnay Madaarka Berbera Terminal cusub oo laga dhoofo, waxaanu dayactirnay dhababa dayuuradaha ee Berbera (ranway) waxaanu furnay Madaarka Borame oo aan shaqayn jirin mudo sided sannadood ah sidoo kle waxaanu furnay Garoonka Burco oo xidhnaa Sadex sannadood. waxa aanu balaadhinay qaybat laga dhoofo Madaarka Hargeisa. Waxa gacanata Dawladda ku soo wareegay Madaarka Ceerigaabo oo haatan hoos imaada Wasaaradda Duulista iyo Hawadda.

5. Warfaafinta Qaranka waxaanu ka dhigany mid loo simanyahay oo cid walba iska arki karto halka markii hore ay ka ahayd mid dhinac kaliya u adeegta. Waxaanu meesha ka saaranay yoyotankii hore u jiray.
6. Waxaanu midaynay Radio Hargeisa iyo TV-ga Qaranka oo markii hore Madaxtooyadda hoos iman jiray. Waxaanu soo kordhinay Barnaamijyo cusub oo tayo leh , sida Barnaamijka Maqal dadkaaga kaas oo wax wayn ka taraya isku xidhka xumukamada iyo shacabiga
7. Waxaanu dayactir iyo dib u habayn ku samaynay dhisamaha Qasriga Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland .
8. Waxaani dib u kicinay 12 mishiin oo ah mishiinadii Madbacdii Qaranku ku shaqaynaysay, waxaana suurto gashay in ay daboosho hawalaha daabacaadda Daqaladda .
9. Waxaa lagu guulaystay in 171 arday loo helo deeq waxbarasho oo dibadda ah. Kuwaas oo si cadaalad ah loogyu qaybiyey goballada, mudnaantana lagu kala siiyey siday imitaxaanka u kal sareeyen. Ardaydaa waxaa loo kala diray 31 araday Libiya, 30 araday Sudan, 10 Arday Malaysia, 100 araday Ethiopia.
10. Ahanti Dhawrka Qaranka waxaanu siinay awood buuxda iyo madax bunaani ay meel walba ku baadhi karaan. Sidoo kle waxaanu abuurnay gudigii Maamul Wanaaga iyo la Dagaalanka Musuqmaasuqa oo Iyana aanu awood buuxda siinay.
11. Annagoo sugayna amaanka Qaranka, waxaanu gacanata ku dhignay dad ku hawlanaa falal argagixiso iyo xasilooni daro in ay ka fuliyaan dalka. Sidoo kle waxaanu samaynay guddiyo ka shaqeeya nabadgaliyada ilaa heer xaafadeed. Annagoo la dagalamayna tuugada, waxaanu qab-qabanay, sharcigan marinay ku dhawaad 200 oo qof , kuwaasoo lagu helay falal tuugo iyo mukhaadaraad ah, taasoo hoos u dhigtay fal danbiyeedyadii dhici jiray, gaar ahaan Caasimadda waxaanu baabi'inay gudidii nabadgelyada ee xukunka degdega ah u qaadi jirtay si aan sharciga ku fadhiyin.
12. Waxaa wadanka ka dhacay dhacdooyin halis ah oo loogu talo galay in kahlhkal lagu geliyo amaanka wadanka, sida Ciidamadii ONLF eek a soo degey xeebta Galbeedka, shaqaaqadii kalshaale, iyo dhibtii ka soo cusboonatay deegaanka Ceel-bardaale. Arrimaas waxaanu ku qaadnay talaabooyin cadcad oo wax ku ool ah.

Kalshaale

Markii ay arrintaasi dhacday dawlad-ahaan waxaanu qadnay talaabadii ku haboonayd, isla marakiiba waxaanu kala dhexdhigany cutubyo ka tirsan Ciidanka JSL si ay u kala caabiyaan malayshiyaadka labad beelood nabadana u sugaan , isla markiiba waxaanu u dirnay guddi dhexdhexaadineed oo ka kooban xukumada , Golayaasha, Xisbiyada, Madaxdhaqmeedyo iyo Culimada, si nabad looga dhaliyo waxaa aanu kasoo saaranay go'aan cadaynaya in ay goobtaasi tahay dhul daaqsimeed, ciidanka qaranku fadhiisin ku yeelanayo.

Haddaba si aan arrintaa mugdiga uga saaro lacagtii iyo hantidii iyo gashay Barkada ah halkaa ka qodan waxaanu bixinay toddobaadkan, ciidamada qaranka waxaan amar ku siinayaa in ay aasaan.

13. Waxaanu hawl galiney Hay'adda Dhawrista Tayada Cuntada, dawda iyo wixii la mid ah (Quality Control Commission). Taas oo talaabo ka qaaday cuntooyinka iyo dawooyink dhacay oo dhan 1,200 oo tan
14. Madaama uu caafimadku yahay aasaaska nolosha, xukumaduna waxay xoogga saaratay sidii ay u soo kordhin lahayad adeegyo cusub. Waxaa shan xarumood oo cusub lagu kordhiyey barnaamijka xakamynta cudurka qaaxada. Waxa heshiisa lala galay Hay'addo caalami ah oo ay ka mid yihiin DFID, MSF. Holland MSF, Belgium MIRLIN iyo Hay'adda Qararamada Midowbey ee UNDP kuwaas oo xil qaaday cisbitaaladda iyo adeegyada caafimadka ee magaalooyinka Burco,Ceerigaabo ,Oodweyne, iyo Goballada Saaxil iyo Salal iyadoo inta hadhayna aanu gacanta ku hayno.
15. Waxa dib u dhis lagu sameeyay xarumaha Maxkamadaha Rafcaanka Hargeisa iyo Gobalka Awdal.
16. Waxaa aan gacanta ku haynaa dib u hagaajinta wadada kalabaydh-Dila oo la filayo in ay dhamaato horaanta bisha March 2011 Dhisidda wadad Dila ilaa Boorma oo dhan afar Kilometer, oo ay ku baxayso lacag dhan $ 350,000. Waxaanu dhamaystirnay biriijka labaad ee Hargeisa oo dhawan la furi doono. Musharuucan oo soo jiitamaayey mudo lix sannadoodo ah wuxuu ku kacay qabyo-tirkiisu lacag dhan $300,000 oo ay xukuumaddu bixisay.
17. Waxaanu ka dhisnay kawaan hilib oo cusub iyo suuq khudradeed magaalada Lascaanood, taas oo ay ku baxday lacag dhan $275,000. Ceelka biyaha ee Laascaanood ayaa laga hawlgalay oo gacanta lagu hayaa.
18. Ka faa'iidaysiga khayraadka baddu waa waxayaabaha ay xukuumaddani siinayso ahmiyadda, sidaa darteed muddaddii gaabnayd waxaanu tababaro xirfadooda kor loogu qaadaayo u samaynay kaluumasatada wadaniga ah, iyadoo qalab cusub oo ay ku jilaabtaana la siiyay.
19. Iyadoo xukuumadani hirgalinayso tartanka suuqa xorta ah, waxay ogolaatay furitaanka maxjarka labaad oo lagu baadho laguna xanaaneeyo xoolaha dalkeena ka dhoofaya. Taasina waxay suurto galisay in ay dalka ka dhoofaan xoolihii ugu badanaa ee xiliga xajka oo dhan in ku dhaw Sadex Milyan oo neef (2,798,944). Labada maxjar waxaa ka shaqo gala in ka badan 100 dhakhtar oo ay ku jiraan dhakhaatiirtii dhalinyarada ahayd ee jaamacadaha dalka ka qalin jabiyey.
20. Waxaanu soo saarnay Buug Xogta Qaranka (Somaliland in Figures). Oo baaqday sanadadii 2008-2009
21. Doorashadii xorta ahayd eek a dhacaday Somaliland 26 June 2010-kii, xasiloonida dalka ka jirta, iyo xukuumaddan kooban ee tayada lihi, waxay soo jiiteen indhaha beesha caalamka. Annagoo ka faa'iidaysanayna dareenkaas, waxaanu dar-dar galiney siyaasadeena arrimaha dibada. Waxaanu socdaalo dawladeed ku tagnay wadamada Djibout, Ethiopia iyo Ingriiska, kuwaasii naloogu soo dhoweeyey si maamuus iyo maqam sare leh. Isbedelkaa rajada badan dhaliyey wuxuu keenay in markii ugu horsey ay si toos ah dawladaha qaarood inoola macaamilan. Waxaanay dhiiri gelisey in ay dalkeena yimaadaan, markii ugu horeesay wufuud isdaba joog ah ilaa heer wasiir ahi.

22. Waxaanu dhaqan galinay saacadii shaqada ee sharciga ahaa min 7:00-da subaxnimo ilaa 2:00-da galabnimo .
23. Annaga oo dhiiri galinayna kobaca dimuqraadiyada iyo hana qaadka xisbiyada qaranka . waxaanu si siman 50% ugu kordhinay qadarkii lacagta ahaa ee ay hore u qaadan jireen
24. Si aan ula dagaalano Musqmaasuqa, waxaanu khasnadda dhex ee dawladda ku shubnay dhamaan dakhligii ilaha dhaqaalaha dalka, sida: Dkhalgii Maxjarka. Kii Haamaha Shidaalka (Total) kii kirooyinka bakhaarada. Kii Madaaradda , kii Warfaafinta, kii Xanaanada xoolaha, kii Kaluumaysiga iyo kii Dekedda Berbera.
25. Waxaa la dhamaystiray Xabsiga dhexe ee Hargeisa oo hadda shaqaynaya.
26. Shirkadda Totol waxaa lala galay heshiis aan Golaha Barlamaanka l horkeenin sidii uu sharcigu qabo, maadaama uu yahay heshiis caalami ah sida uu sheegay qodobka 53aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Sidaa dareed, waxaan u diray Wasaaradda Maliyadda iyo Wasaaradda Ganacsigu inya soo cadeeyaan xisaabta inoo dhaxaysa shirkada Total iyo sido kale sharaciyaqaan ka soo talo bixiya, gacantaana lagu haya. Waxaan ku rajo waynahay in aan ka soo saari doono ga'aan cad.

4 ,Qorshe Sannadeedka 2011

1. May jirin qorshe dawladeed oo habaysani, waxaay xukuukumaddu ku gudo jirtaa diyaarinta qorshaha wax qabad ee 5-ta sannadood (Five Years Plan) ee soo socta oo soo bixi doona laba todobaad gudahood.
2. Gobalada waxaanu ka dhisanay gudiyo ka talin doonta qorashaha horumarinta gobaladooda.
3. Waxaanu hirgalinay xeerka Hay'addaha aan dawliga hayn (nomn State Actors). Oo aan dhawaan sexeexay, kaasi oo wax-ayn ka badeli doona qaabka wad shaqaynta dawlada iyo hay'addahaas.
4. Waxaanu diyaarinay Misaniyada sanadeedkii 2011, taas dakhaliga odoriskeedu yahay lacag ka badan Shan Boqol oo Bilyan (SH.SI 527,720,451,857), taasoo marka la barbar dhigo miisaaniyaddii kal hore ka badan 70%.
5. Waxaanu kordhinay Mushahaarooyinkii shaqaalah iyo Ciidamada 100% laga bilaabo bishii Janaury ee 2011 waxaa Iyana mushaaharada loo kordhiyay mudanayaasha labada gole. Baarlamaankana waxa la horkeeni doona sharciyada:

    a. Xeerka miisanaydda Qaranka
    b. Xeerka maaraynta iyo Maamulka hanataida qaranka
    c. Xeerka Qandaraasayda Qarnka
    d. Xeerka Hanti Dhawrka Qarnka

Dhinaca kalan waxaanu faafin rasmi ah ku samaynayanaa xeerka dalka ee ansaxay ee aan hore loo faafin

6. Waxa kale oo aanu ku guda jirnaa diyaarinta iyo dib u habaynta shuruucda cashuuraha wadanka.

7. Waxaanu badleynaa sannadkan lacagta giinbaarta ah ee Gobaladda bariga dalka lagu istacmaalo oo mudo dheer dalka iyo dadkaba dhibaato ku haysay.
8. Sida loo dhiiri galiyo maal-gashiga , lahaanshaha gaar ahaaneed iyo warshadaynta, waxaanu dhamaystirnay xeerkii lagu abuuri lahaa bargiyo ganacsiga ee gaarka loo leeyahay .
9. Waxaanu golah hor keenaynaa shuruucda maal-gashiga, sida xeerka Gancsiga, xeerka Qiimaynta tayada Badeecadaha iyo xeerka horumarinta wax soosarka dalka.
10. Waxaanu sannadka 2011 ka dhisaynaa Madaarka Hargeisa dhabe cusub oo heer caalami ah oo ay diyaaraduhu ka haadaan, sidoo kale waxaanu dhisamayaal , qalabayn iyo qurxin ku samayndoona Madaarka Hargeisa iyo Berbera, taasoo suuro galin doonta in diyaaraddah Waawayni babeen iyo maalinba ka soo degaan kana Duulan Madaaradda. Mushruucan waxa ku bix doona lacag dhan Toban Million oo Dollarka Maraykanka ah oo ay Dawladda Kuwait innoogu deeqday. Sidoo kale waxaanu dayactir ku samaynayanaa madaaradda Burco, Boorama, Ceerigaabo. Lascaandood iyo kala-baydh.
11. Waxaanu dib u haagjin ku samaynaynaa wadad Berbera- Hargeis Hargeisa – kalabaydh, Burco- Laas-caanood, laascanood ilaa xadka sidoo kle waxaanu dayctir ku samaynayanaa biriijka labaad ee Burco.
12. Si loo yareeyo kahasaaraha iyo shilalka batay ee gaadiidka, ee ay qiyaas ahaan ay ku dhintaan dad gaadhay 300 oo muwaadan sanndkii walba , kuna dhawcmaan ilaa kun iyo laba baqol oo wuwaadin. Waxaanu qorshaynaynaa meel marinta isticmaalka gaadiidka shukaanta ku leh bidixda. Waxaanu waajibinaynaa hubinta tayada gaadiidka socda sannad kasta. Waxaanu soo rogynaa xidhashadda suunka amaanka (safety belt) dhinaca kale waxaanu joojinaynaa ku hadalka Moobilka wakhtiga gaadidka la wado. Calaamadaha gaadiidka lagu kal hogo ayaa jidadkoo dhan loo samaynayaa.
13. Innaha oo si haboon uga faa'iidaysana, una maamulayna khayraadka baddenu, waxaanu dib u eegis balaadhan ku samaynaynaa xeerarka iyo nimaadmka kaluumaysiga iyo ilalinta badda iyo xeebaha. waxaanu dhiiri gellinaynaa Kaluumaystadda wadaniga ah taasoo suurta geli doonta in si cilmiyeysan looga faa'iidaysto cunsta iyo istcmaalka khayraadka badda.
14. Laf dhabarka dhaqaalaheenu waa xoolaha kuwaasoo ay xiligan dhibtooyin waawayni soo food saareen, sida: abaaro, dhul daaqsimeedkii oo la ootay, nabaad guur, biyo la'aan, cuduro IWM. Waxaanu hawl gelinynaa lix kooxood oo ku wareega gaoballada oo ah dhukhaatiirta xoolaha. Waxaanu ku dadlaynaa in aanu gobalada dalka ka hawl-gelinno shaqaalihii ilaalinta deeganka (Foresrty), waxaanu fulinaynaa sharciyada maamnuucayaa goynta iyo gubsita dhirta qoyan sdo kale waxaanu gacant bir ah ku qabnaynaa, dhul daaqsimeedka sida sharci darada ah loo ootay. Waxaanu joojinaynaa samaynta tuulinyka cusub ee dhul daaqsimeedka halista ku ah.
15. Waxaanu soo saaraynaa siyaasad cad oo kal qeexaysa shaqaalaha ajnabiga iyo muwaadiniinta, xukuumadayadu waxay tix galinaysaa shaqo galinta haweenka.

16. Waxaanu joojinaynaa barnaamijkii aynu soo celinay ee “iskaa wax u qabso” oo aynu markii horebainnagu curintiisa lahayn . markiaa cududa ummada la ssug-geeyana wax wayn ayay qaban karaan.

2. Arramaha Bulshada

1. Si loo daboolo baahiyaha caafimaad ee dlaka ka jira waxaanu shaqo glinaynaa sannaddkan 61 dhakhtar oo 41 ka mid yihiin aradydii ka qalin jebisay jaamacadaha caafimaadka ee Camuud iyo Hargeisa. Waxaanu Iyana shaqo galinaynaa 382 kalkaaliye caafimaad pp 59 ka mid ahi ay sannadkan ka qalin jabeyeeyn Edana Hospital, Cumuud, iyo Dugsiga Kal-kaaliyeyaasha caafimaadka ee Hargeisa.
2. Waxaanu kor u soo qaadaynaa tayada waxbarashada ee dugsiyada Dawladda. Annagoo ka duulayna taasi, waxaanu shaqaalaysiinaynaa 1,500 oo macalin oo ka dhigaya dugsiyadda hoose-dhexe. Waxay xukuumaddu kafaalo qaadaysaa in ay ka bixso lacagta fiiga jaamacadda 20-ka araday ee ugu sareeya imitaxaanada dugsiyada sare ee dawladda. Sidoo kale annagoo dhiiri-galinayna waxbarashada habalaha, waxaanu ka bixinaynaa fiiga jaamacadda 6-da hablood ee ugu sareeya imitaxaanada dugsiyada saree e dawladda kuwaasoo dheeraad ka ah 20kii hore.

3. Iyadoo haatan shanti aradayba hal bug ka dhexeeyo, waxaan sannadkan ardayda dugsiyada dawladda u qaybinaynaa buugaag ku filan (Taxt Books.)
4. Waxaan xooga saarnay waxbarashadda farsamada gacanata, si aan u xaqiijino arrintan, waxaanu u hawlageleynaa sidii dib u dhis iyi dib u habayn loogu samayn lahaa dugsiyadii farsamada gacanata ee Hargeisa iyo Burco ee horey u jiray. Waxaanu si dhakhso ah u dhisaynaa Komishanka Tacliinta sare kaas oo qiimayn ku samayndoonta tayada jaamacadaha.
5. Waxaanu gacanta ku haynaa tayaynta manhajka waxbarashada, jaamacadaha iyo dugsiyada. Waxaanu qorshaynaynaa barnaamiyo wax la tara aafada wax akhris la’aanta oyo qoris la’aanta, annagoo ku hamiyeyna in maalin maalaha ka mid ah la arko shacbiga Somaliland oo dhamaantiin wxnna akhriya, waxna qora. Waxaan madaxda dawladaha hoose ee dalka gaar ahaan kuwa magaliiyinka waawayn ee Hargeisa Burco, Boorame, Ceerigaabo, Barebera,Lascaanood iyo Gabilay farayaa in ay qorshahooda sannadka ku darsadaan oo ay samayaan Maktabado Buugaagta lagu akhristo(Library), oo at tusaale u nodaan magaalooyinka kale.
6. Si loola tacaalo abaarta xoogan ee manta dalka ka jirta,waxa aan bulshada reer Somaliland ugu baaqayaa in ay gacan ka gaystaan biyo la’aanta. Cudurada iyo cunno yaridaka dhashay abaaraha waxaan u soo jeedinayaa golayaasha qaranka (wasiiradda, wakiilada iyo Guurtida) inay mushaharkooda ku deeqaan boqolkiiba labaatan (20%) hal bil mushaharkaas oo ay kaga qayb galaan gurmadka, sidoo kale dhamaan shaqaalaha dawlada, shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo

shaqaalaha hay'daha samafalka in ay mushahrkooda bil kali ah ka bixyaan Boqolkiina toban (10%)

7. Waxaan furaynaa sanduuqa Zaakada oo wax weyn ka qaban doona hawlaha khayriga ah. Waxaanu kor u qadaynaa milgaha iyo maamuska Wasaaradda Diinta iyo Aqaafta.
8. Anniga oo og qiimaha ay dalka ugu fadhiyaan Mujaahidiintii SNM ee dalkan xoreeyey, iyo agoomihii ay ka tageen, xukuumadaydu waxay xooga saari doontaa sidii wa loogu qaban lahaa, si taas loo suurtageliyo waxaan ku guda jirnaa talo uruursi sidii dib loogu habayn lahaa ee loo tayo-galin ;lahaa Jimciyadda Mujaahidiinta ee Sooyaal
9. Dhalinyaradu waa mustaqbalka dalka, waa xooga maanat, waa madaxda burrito, waxaanay mudanyihiin in markasta maanka lagu hayo wax tarkooda iyo dhismahooda. Xukuumadda cusubna waxaa ka go'an in ay ka dhabayso isbedelkii ay ku baaqday ee ay horumarinta dhalinyaradu adhaxda u ahayd. Waxaan hubaal ah in ay dhalinyaradu noqondoonto cid ugu horytsa ee manafaciisu haanteedda.

3. <u>Dawlada Wanaaga</u>

I. Si loo ogaado tayada shaqaalaha dawlada waxa dhamaantood la marin doonaa imitaxaan, shaqaalaha imitaxaankaas gudba mushaharka waa loo kordhinayaa, kuwa aan gudbina lama eryaayo balse xirfadooda ayaa kor loo qadayaa, mushaharkoodii horena way qaadanayaan. waxa kale oo sannadkan la qaadanayaa shaqaale cusub oo gaadhaya 2,335 qof.

II. Maadaama oo ay cadaaladu aasaas u tahay nolosha, nabadgelyada, iyo hurumarka, waxaan qirayaa in ay dhamaanteen xukuumadda. Baarlamaank, Hay'adaha Garsoorka iyo Shacbigaba into taalo qabyo-tirkeeda. Sidaa darted, waxaan farayaa Wasaaradda Cadaaladda in ay soo qorshayso islamarkaana kulmiso oo au fadhiisiso guddida cadaaladda iyo guddi hoosaadyada baarlamaanka eek u shaqo leh, iyo ciddiii kale ee talo la moodo sida culimada iyo jaamacadaha, sida ugu dhakhsaha bandanna ay ku keenaan taladooda. Waxaanan ku rajo waynahay in uu kulankaasi soo saari doono daraasad rasmi ah oo waxtar leh markaana ay suurtagal noqondoonto in uu xalku soo dhawaado.

III. Waxa uu saluug badani ka imanayaa qaar ka mid ah maamulada dawladaha hoose ee dalka iyo golayaasha deegaanadda. Sidaa darteed, waxaan leeyahay waa in ay ogaadaan mas'uuliyadda ka saran Muwaadiniintii soo dooratay. Waa in ay ogaadan in illahay ku eegayo amaanada culus ee loo egmaday. Xukuumaddayduna waxay ku samayndoontaa dabagal iyo la xisaabtan buux. Intii xilkeeda ka soo baxadayna waxaan u soo jeedinayaahambliyo iyo bogaadin. Waxaan si gaar ah u bogaadinayaa maamulka Gobalka Saaxil.

4. Wacyigelinta iyo Isgaadhsiinta

i. Waxaanu sannadka 2011 dalka keenaynaa Idaacad cusub oo dalka gudihiisa iyo dibadiisaba wada gaadha taasi oo wax weyn ka tari doonta wacyigelinta wadaniyadda, waxbarashada, caafimaadka iyo nabadgeliyada.

ii. Anagoo mar walba tixgalinayna madaxbanaanida ganacsiga, si looga baxo dhibaatada shacbiga ka haysata isku xidh la'aanta isgaadhsiinta dalka, waxaanu hirgalinaynaa sannadkan isku xidhka shirkadaha isgaadhsiinta Somaliland (inter connecation) oo aan waxba u dhimaynin horumarka ay ku talaabsatay isgaadhsiinta casriga ah ee Somaliland oo ku ammaanayo.

5. Nabadgaliyada

1. Waxaanu dhisnay 12 saldhig Boolis oo laga dhisay degmooyinka cusub, waxaan kor u qaadaynaa tirada iyo tayada ciidanka Booliska.
2. Si koor loogu qaado xirfada Saraakiisha iyo askarta ciidanka Qaranka, waxaau dhisaynaa kuuliyadda saraakiisha ciidamada qarank, waxaanu sannadkan siinaynaa Ciidmada Qaranka , Booliska iyo Asluubta derjooyin, waxaanu xoojinaynaa cududa ciidamada qalbka sida.
3. Sidii aynu horba ugu adkayn, waxaanu xoojinaynaa dadaalka aynu ugu jirno ka hor tagga iyo ladagaalanka budhacd badeeda iyo ilaalinta xeebaha dalka. Waxaanutayeynaynaa ciidanka ilaalada xeebaha.
4. Ismaamulka goobaleed Puntland waa dhul aanu jaar nahay xidhiidh xidhiidh ganacsina naga dhexeeyo. Waxaanu jecelnahay in aan nabad ku wado noolaano. Sidoo kale waxaanu diyaar u nahay kaashano waxyaabo badan,oo halis ku ah deganaanshaha maandaqada. Hasa yeeshee, waxaan uga digeynaa in ay faro gelin ku sameeyaan arrimaha Somaliland.
5. Somaliland waxay xaq uleedahay difaaca xuduudaheeda sugan kuwaas oo lama taabataan ah. Waxaanay diyaar u tahay in ay iska difaacdo cid kasta oo ku soo xad gudubta qaranimadeeda.
6. Waxaan ka xumahay warka saak I soo gaadhay kaasi oo sheegay in ciidamandeenii joogay aaga Buuhoodle la soo weeraray anigoo ku kalsoon in ay iskadifaaci doonaan cid kasta oo soo far-galisa wadanka. Waxaan dhamaan farayaa Golayaasha Qaranka, bulshaweynta reer Somaliland iyo xoogaga kaladwan ee ciidamada in la isu-taago difaaca dalka. Ciidamada qarankana waxaan amarayaa in ay sidii dhaqanka u ahayd ilaaliyaan dadka shacabka ah ee aan hubaysnayn kana dhawraan inuu khasaare ka soo gaadho.

6 Arrimaha Dibadda

i. Waxaanu kor u qaadaynaa xidhiidhka aan la leenahay wadamada jaarka ah. Waxaanu ka hawl gelaynaa sidii aynu sidii aynu xidhiidh dhow ula yeelan lahayn wadamada carabta iyo kuwa islaamk.anigoo kar u qaadayna xafiisyadii .wakiiladda Somaliland ee dinadda, waxaanu xafiis cusubka furaynaa Koonfurts Suudan iyadoo aynu ognahay ahmiyada ay Somaliland u leedahay in ictiraaf buuxa la helo, waxay xukuumadaydu geed dheer iyo mid gaabanba u fuulaysaa sidii ay Somaliland aqoonsi uga heli lahayd beesha caalamka.

ii. Waxaanu tagaynaa madal kasta oo danta Somaliland ku jirto. Waxaanu ka codsanaynaa shacbiga Somaliland gude iyi dibadba in ay ka qayb qaataan ololaha aqoonsi raadinta Somaliland, iyada oo aynu ognahay doorka muhiimka ee ay ku leeyihiin dib u dhiska qaranka Somaliland. Dhawaana waxa la qaban doona shir balaadhan oo lagaga wad tashanaayo habka ictiraaf raadinta Somaliland

iii. Waxaanu ka soo horjeednaa kooxda argagixisada iyo budhcad badeeda kuwaas oo nabad geliyada Somaliland iyo geeska afrika dhib badan ku haya. Waxaanu iskaashi buuxa kala yeelanaynaa beesha caalamka, gaar ahaan dalalka deriska ah sidii uu gobolkani u ahaan lahaa mid xasiloon.

7 . Arrimaha siyaasadda Gudaha

a. Ururada siyaasadda:

Ballan qaadkaygii hore waxa uu ahaa in aanu ogolaanayno furashada ururada siyaasadeed si sharciga waafaqsan wax iska bedalayna ma jiro. Hase yeeshee, arrintaani waa mid u baahan wad tashi iyo talo qaran, sidaa aawheed, annagoo ku joogna dhaqankeeni ahaa talo wadaagga,waxaanu dhakhso ugu yeelanaynaa talo qaran.

b. Doorashada:

Anigoo tix-raacaya ga'aanka uu Golaha Guurtidu ku muddeeyay doorashada golyaasha deegaanada waxaanu qabanaynaa doorashada dawladaha hoose sannadkan guduhiisa, taasoo suurta gelinaysa kobcinta geedi socodka dimuqraadiyadda aynu dhanadeeda hayno. Maalinta doorashada, waxaa cayimi doona komishanka Doorashooyinka.

Shaki kuma jiro sidaan horeba u sheegay in aan saluugsanahay muddo kordhinta dheer ee ay Golaha guurtidi u sameeyeen labadan aqal (Guurtida iyo wakiilada). Haddana anigoo ixtiraamaya go.aankaaa sharciyadiisa, waxaa hubaal ah in ay qaranka dhiig bax ku tahay in saddex sano oo isku xiga 2013, 2014, iyo 2015 uu dalkani galo dooradhooyin, sidaa darteed

waxaan Golaha Guurtida ka codsanaynaa in labadaa doorasho ee Baarlamaanka la iskugu raro 2013.

c. Diiwaan gelinta:

Inkastoo doodi ka taaganatahay tayada diiwan gelinta cod bixiyayaasha aynu haysano, waxa xaqiiq ah in la sixi karo godalooloyinka yar-yar ee ku jira, waxaanu soo jeedinyayaa in la qabyo tiro wixii ka dhiman. Isla markaana la diwaan galiyo da'yarta qaan-gaadhay intii ka danbayesey. Waxaan ku kalsoonahay in koomishanku Doorashooyinka Qaranku ay dabooli doonaan masuuliyadan, sida ay horeba ugu guulaysteena, gacab buuxdana wanu ka siinaynaa gudashada xilkooda.

D. Sool iyo Sanaag

Anigoo garwaaqsanaya dib u dhaca ka jira dhinac horumarka Gobaladda Sool iyo Sanaag bari. Waxay dawladu ku dadaalaysaa sidii ay kor ugu soo qaadi lahayd. Sidoo kale waxxanu diyaar u nahay in tabashooyinka siyaasadeed la isaga qanciyo si wanaag iyo walaalnimo leh

6. Gabagabo

1. Golayaasha

2. Muddo badan ayaa Somaliland ku soo jirtay xifiiltan murgufo ka dhe taagan golayaasha sharci dejinta xukuumada iyo asxaabta sidaa darteed:

Mudanayaal iyo Marwooyin,

3. Si aynu u xaqiijino hadafka qaranka iyo himilooyinka aynu xigsanayno, wax lagama maarmaan ah in aynu ku bedelano jawi iskaashi iyo wada shaqayn. Aniga iyo xukuumadaydu waxaa ka go'an in aanu si hagar la'aan ah idiinla shaqayno, idinkana waxxaanu mar labaad idinka codsanaynaa in aad gacan buuxda na siisaan. Xeerarka idin horyaala aad ansixisaan sida:
    - Xeerka miisaanaydda
    - Xeerka isgaadhsiinta
    - Xeerka hay'adda NDC.
    - Xeerka Nabadgeliyada.
    - Xeerka maamul dejinta(Adendement)
    - Anniga oo og ahmiyadda xisbiyada mucaaradka ahi uu leeyihiin dalka, wacaanu u soo jeedinaynaa in si xilkasnimo iyo isku duubni ah lagu waajeho hawlaha danta qaranku ku jirto.

2. Saxaafadda

- Xukuumadayadu waxay ku timid hanaan dimuqraadi ah doorsho xor iyo xalaal ah, waxaanay mar walba ixtiraamaysaa xuquuqda iyo xoriyaadka asaasiga ah ee

xorreyatul-qawl. Aniga waxaad igu taqaaneen in aan marwalba difaaco xorriadda saxaafadda iyo madaxbanaanida fikirka muwaadinka. Maanatana waxaan la taaganahay oo aan dalkan ku hogaaminayaa dhaqankaasi. Waxaan dulqaad u leenahy dhaliilaha toosinta ah ee naloo soo jeediyo. Hasa yeeshee saxaafada laftigeeda waxa looga baahanyahay masuuliyad iyo bisayl xirfadeed .

3. Culimada

- Maadama aynu 100% dad muslim ah aynu nahay, wax culimada door wayn iyo mas'uuliyadi ka saaranatahay ilaalinta diiinta islaamka, dhaqanka suuban iyo amaanka. Waxaa lagama maarmaan ah in aan ka midown iskana kaashano duruufaha jira si aan da'yarteena loogu marin habaabin fikirado xag jir ah oo aan diinteena waafqsanayn.

4. Beesha Caalamka

- Waxaaan diyaar unahay in aan kal shaqayno beesha caalamka danaha guud ee la wadaago sida amaanka, la dagaalnka budca- baddeeda iyo Deegan dhwrista. Waxaanu soo jeedinaynaa dawladaha caalamka in ay garwaaqsadaan rabitaanka iyo xaqqa ay u leeyhiin shacbiga Somaliland aaya ka tashiga madax-banaanidooda. Sidoo kale waxaanu ka codsanaynaa Qaramada Midoowbey, dalalka Qeeq-bixiyayaasha iyo Ha'addaha samafalka in ay si mug leh noogala qaybqaatan dib u dhiska qarankan oo u gudbay marxaladii horumarka.

5. Dadwaynaha

- Shacbiga Somaliland waxaan ugu baaqayaa dibed iyo gudaba in ay u midoobaan ilaalinta qaranimada iyo horumarkooda, kana foojignaadaan xeeladaha cadowgeena isla markaana la shaqeeyan ciidamada nabadgaliyada ku hawlan innagoo ka war qabna hirdanka ka dhexeeya aragtida qabiilka iyo qaranimada oo khatar galin kara jiritaanka dawladnimadeena. Marnaba aqbali mayno cid kasta oo isku dayda in ay dhaawacado nabadgaliyada iyo dimuqraadiyada ka hana qaaday dalka.
- Adeega dawladi dadkeeda u fidiso ee ay ugu mudanyihiin nabadgaliyada, caafimaadka, waxbarashadda, iyo cadaaladdu wuxuu ku xidhanayhay qadarka cashuurta ay bixiso ummadu. Sidaa darteed, waxaan muwaadiniinta ka codsanaynaa in ay si hagar la'aan ah oo wadaniyad leh u bixiyaan cashuurta ku waajibtay.
- Waxaan ka war qabnaa in ay abaar ba'ani dalkeena ka jirto, taas oo u baahan dawlad iyo dadweynaba in aynu iska kaashano oo aynu naf-hur iyo tabarruc ugu

gurmano inta ay saamaysay ee bulshadeena ah. Xukuumadddu waxay bixisay kharashkii biyo-dhaamiska qaybtii ugu horaysey oo dhan 600 oo booyadood oo la gaadhsiiyay gabalada ugu daran.

- Anigoo garwaysan rajada faraha badan ee xukuumadayda laga filayo, waxaa ogaataan in aanu isbedelka loo baahanyahay iman Karin lix bilood iyo sannad toona. Hase yeeshee," Ninna korkiisa biyo kama dhwree" waxaad ku waxaad ku kalsoonaataan in aannaan waxabaka hakran doonin dalkayga iyo dadkayga."
- **Illaahay waxaan ka baryeynaa in uu roobka inoo shubo abaarahana inaga dul qaado. Illaahay waxaan ka baryenaa in uu tubta Doosan, tawfiiqda iyo talada wanaagsana ina waafajiyo. Amiin Amiin…….**
- **Wassalaama Calaykuma Wa Raxmatulaahi wa Barakaatu**